# Gargaarka Sharciga ah "Legal Aid" (Xafiiska Caawinta Sharciga ah)

## In yar ka hor ayaan diray codsiga lagu dalbanaayo qareenka/Abuukaate, welina ma helin qareen. Maxaan sameeyaa?

Waxay qaadan kartaa in muddo ah in Legal Aid **(Xafiiska Caawinta Sharciga ah)** ay kuu helaan qareen.

Waxaad dadajin kartaa dalbkaga adigoo wacaya mid kamid ah xafiisyada qareenada kana codso haddii mid ka mid ah qareenadooda uu aqbalikaro kiiskaga islamarkanaa aad doneysid in lagugu khidmeeyo nidaamka Legal Aid. Haddii aad hesho qareen aqbala kiiskaga, la xidhiidh Legal Aid oo u sheeg.

Aad ayeey muhiim u tahay inaad xaadirtid dhammaan balamaha aad la leedahay maxkamadda ee so socdo, Haddii aad leedahay qareen iyo hadii aad laheynba.

Haddii aad leedahay balan maxkamadeed, ama aad si dagdag ah ugubaahatid qareen la xidhiidh Legal Aid una sheeg. [Legal Aid]

## Waa maxay xogta kale ee laigarabo inaan sheego marka aan codsanayo Legal Aid?

Marka lagu daro xogta ku saabsan caddaynta dakhliga, waa inaad sidoo kale bixisaa xogta soo socda:

- Dukumiintiyada kiiskaaga (oo ay ku jiraan nuqul ka mid ah amarrada maxkamadda)
- Taariikhda maxkamaddaada, haddii aad leedahay
- Magaca qareenkaaga, haddii aad heshay qareen
- Xogta ku saabsan deymahaaga, hantidaada, iyo kharashaadkaaga.

## Kiisas noocee ah ayey kaa caawin karaan Legal Aid (Xafiiska Caawinta Sharciga ah)?

Haddii aad u qalantid barnaamijka Legal Aid waxay kaa caawin karaan:

- Arrimaha sharciga qoyska sida furriinka, qorsheynta waalidnimada, iyo taageerada arimaha ilaalinta carruurta.
- Arrimaha dambiyada ee dadka waaweyn iyo dhalinyarada
- Khilaafaadka la xiriira kaalmada/gargaarka dakhli
- Arrimaha socdaalka iyo qaxootiga
- Kirada guryaha
- Kiisaska danta guud ee la xiriira xuquuqda aadanaha, saboolnimada, macaamiisha, deegaanka, iyo xuquuqda dadka asalka ah

Legal Aid kaama caawinkaraan arrimaha la xiriira warqadaha dhaxalka, awoodaha qareen-nimo, hantida, qaybinta hanti, arrimaha shirkadaha ama dacwadaha madaniga ah (dacwaynta qof, ama in lagu dacweeyo).

## Sidee ayaan ugu qalmaa Caawimaad Sharci?

Legal Aid waxay go'aan ku gaartaa iyagoo fiirinaya xaaladdaada dhaqaale iyo nooca kiiska sharciga eed haysato. Xaaladdaada dhaqaale waxaa ku jira lacagta aad kasbato, tirada dadka qoyskaaga ay kakoobanyihiin, iyo waxa aad haysato ee hanti am dayn. Haddii aad rabtid kala tag ama furriin, Legal Aid waxay eegi doonaan dakhligaaga gooniga ah ee aan la xiriirin dakhliga lamaanahaaga.

## Waa maxay caddeymaha dakhliga ee aan ku kulifaqaayo markaan codsanayo Legal Aid?

Haddii aad shaqaysid, waa inaad soo gudbisaa:

- Seddexda warqadood ee ugu dambeysay tasoo muujineysa mushaarkaga, ama
- Nuqul ka mid ah warqadaha canshuur celinta ee ugu dambeysay.

Haddii xubno kale oo qoyskaaga ka tirsan, oo kunool gurigaaga, markii lagudaro lamaanaha sharciga ah, kuwaas oo helaan dakhli, waa inaad soo gudbisaa Mushaarka seddexda warqadood ee ugu dambeyay xubnahaas katirsan qosykaaga.

Haddii aad leedahay ilo kale oo dakhli ah, waa inaad soo gudbisaa dukumiintiyo dheeri ah:

- Haddii aad qaadatid Caymiska Shaqada (EI):
    - Caddaynta Caymiska Shaqada,
- Haddii aad qaadatid raasamaalka ama magdhowga shaqaalaha:
    - Caddaynta xogtaas, ama nuqul ka mid ah warqadahii ugu dambeyay eed lacagta aad kuqaadatay.
- Haddii aad qaadatid caawimaad Bulashada (EIA), keen lambarkaaga caawimaad bulshada iyo warqadda miisaaniyaddaada (haddii la heli karo).
- Haddii aad tahay qof iskiis u shaqeysta, soo gudbi cadeyntii ugu dambeysay ee canshuurta.

## Ma jirtaa khidmad "Lacag"  kusaabsan codsiga Legal Aid?

Badanaa waxaa jira khidmad $25 ah oo lagu codsanayo Legal Aid.
Xaalado gaar ah, tusaale ahaan, haddii aad qaadatid caawimaada bulshada (EIA), ama aad tahay arday waqtigiisa oodhan wax barto, ama aad  ku degantahay hoyiga dumarka, ama aad kujirtid xarun caafimaad ee dhanka maskaxda, khidmadda waa laga dhafayaa.
Waa inaad u sheegtaa **Legal Aid** haddii aad awoodin bixinta khidmadda.

## Maxaa dhacaya haddii aan leeyahay hanti laakiin aanan isticmaali karin?

**Legal Aid** waxay weli kuu magacaabi karaan qareen, laakiin haddii aad heshid xal, waa inaad dib u bixisaa qayb ka mid ah lacagta ay kaa bixisay legal aid.

Haddii aad leedahay hanti, legal Aid waxay saari kartaa hantidaas xaqlahaansho. Xuquuqda lasaarayo hantidu micnaheedu waa in la bixiyo khidmad marka hadii hantidaas la maamulo mustaqbalka. Waxaad sidoo kale lagali kartaa **Legal Aid** heshiis

lacag bixin ah, markaad dhammaysid lacagta heshiiska, **Legal Aid** ayaa kaa qaadi doontaa xuquuqda hantida saaran.

## Malahelaya noocyo kala duwan oo caawimaad dhaqaale ah oo laga helikaro Legal Aid?

Haa. Dadka qaar ayaa u qalma in kharashka qareenka oo idil ay kadhibaan Legal Aid, halka dadka qaar ee awooda ineey iskabixiyaan kharashka ay u qalmi karaan barnaamijka layiraadho (ATP) Kaaso ah Heshiiska lacag bixin ah oo ay fargareyso Legal Aid.

Barnaamijka ATP, waxaad lagarabaa inaad dhigto lacag hormaris ah iyo lacag bille ah oo aan ribo lahayn ilaa aad ka bixiso kharashka heshiska iyo khidmadda barnaamijka oo ah boqolkiiba 25%. Inta aad dhiibeysid lacagta bilaha ah, Legal Aid waxey bixin doonta lacagta qareenkaga.

Si aad uheshid xog dheerad ah oo ku saabsan adeegyada Legal Aid iyo xeerarka dhaqaalaha laxiriir *Legal Aid* ama booqo boggooda Legal Aid's financial guidelines.

## Maka codsankaraa Legl Aid ineey ii badalaan qareenka?

Qareenka in la badalo waxaa la ogolyahay xaalado gaarka ah. Si aad u ogaatid xog dheeraad ah, la xiriir *Legal Aid* si toos ah . Legal Aid

## Hadii aan si dagdag ah ugu baahdo qareen anigoo umaraayo Legal Aid, maxaa dhici kara?

Haddii aad la heshiisid qareen gaar ah ah oo aadan haysan xili kugu filan oo aad sugtid warqada aqbalaada legal aid, qareenkaaga gaarka ah ayaa wici kara legal Aid, una sheegaya dhibka kuhaysta, waxaa helaysaa ogolaansho degdeg ah haddii aad u qalantid.
Haddii aadan haysan qareen oo aadan awoodin inaad hesho, wac Legal Aid una sheeg

ineey kuhaysato arin degdeg ah. Badanaa Legal Aid ayaa kuu qabankaraa nqareen xaaladaha degdegga ah.

Si aad u ogaatid xog dheeraad ah, la xiriir *Legal Aid* si toos ah. Legal Aid

## Sideen ula xiriiri karaa Legal Aid?

**Taleefoonka**

204-985-8511- Codsiyada telefoonka

Wicitaanka bilaashka ah: 1-866-800-8056 - Codsiyada telefoonka

Codsiyada Qadka laga xaeysto (On-line)

Codsiga Qadka lagaxareysto: **On-line Application**

**Xarumaha Codsiga:**

Winnipeg:

Taleefoonka: (204) 985-8500 ama 1-800-261-2960

## Legal Aid waxeey xarumo ku leedahay meelo ka baxsan magalada Winnipeg oo aad telefoonka kula xiriiri kartid:

Brandon – 1-800-766-2148 ama (204) 729-3492

Dauphin – 1-877-622-4660 ama (204) 622-4666

The Pas – 1-855-775-2397 ama (204) 627-4837

Thompson – 1-855-444-4665 ama (204) 677-1224

## Ma helikaraa lambar si degdeg loola xiriirikaro hadii lai xiro/xidho?

*Legal Aid* waxay leedahay wicitaanka qareenada kasoo diyaar ah 24 saacadood maalintii. Haddii lagu xiro, u sheeg booliska inaad ubaahantahay inaad la hadasho qareen kasocdo Legal Aid. Wayna kuu wici donaan.

## Sideen ku ogaan karaa haddii codsigeyga Legal Aid la ogolaaday?

Inta badan waxay qaadataa 1 ilaa 2 toddobaad ineey Legal Aid u gabagbeyso codsigaaga. Haddii aad helin ogeysiis qoraal ah muddo 3 toddobaad kadib codsigaada, waxaad wici kartaa Legal Aid si aad u ogaatid xaaladda codsigaaga:

**Winnipeg:** (204) 985-8500 or 1-800-261-2960

**Brandon:** 1-800-766-2148 or (204) 729-3492

**Dauphin:** 1-877-622-4660 or (204) 622-4666

**The Pas:** 1-855-775-2397 or (204) 627-4837

**Thompson:** 1-855-444-4665 or (204) 677-1224

## Legal Aid ayaa diiday codsigeyga, racfaan maka qaadan karaa?

Haa, racfaan ayaad ka qaadan kartaa go'aanka Agaasimaha Fulinta Legal Aid. Foomka rafcaanka ayaa laguu soo diri doonaa asgoo la socdo Ogeysiiska Diidmada. Rafcaanka waa in lagu soo gudbiyaa 30 maalmood gudahooda kadib markaad heshid Ogeysiiska Diidmada ee lagugu soodiray boostada. Foomka rafcaanka waa in lagu diraa boostada ama fakiska:

**Agaasimaha Fulinta**
**Legal Aid Manitoba**
Dabaqa 4aad – 287 Broadway Ave.
Winnipeg MB R3C 0R9
Fakis: 204-944-8582

Foomkaaga rafcaanka waa inaad ku qayaxdaa sababta aad u malaynayso in go'aanka diidmada khaldan yahay. Agaasimaha fulinta ayaa tixgelin doona sababahaaga wuxuuna dib u eegi doonaa faylkaaga. Agaasimaha fulinta ayaa ama ansixin doona

Legal Aid ama diidi donaa. Haddii racfaankaaga la diido, waxaad heli doontaa warqad kuwargalineyso sababta diidmada.

Agaasimaha Fulinta ayaa go'aan ka gaari doona racfaankaaga 1 ilaa 2 toddobaad gudahood, haddii hadii aan xog dheeraad ah lagaaga baahnayn.
Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan rafcaanka fiiri Legal Aid's website

Haddii Agaasimaha Fulinta Legal Aid uu diido racfaankaaga, waxaad racfaan udirsan kartaa Guddiga Racfaanka ee Legal Aid.

## Racfaan maka qaadan karaa go'aanka Agaasimaha Fulinta ee Legal Aid?

Haddii Agaasimaha Fulinta diido racfaankaaga, waxaad racfaan udiri kartaa Gudigga Racfaanka ee *Legal Aid*. Waxaad racfaanka kuqori kartaa foormkaa racfaanka ee la socota go'aanka agaasimaha, ama, waxaad ku qori kartaa warqado kadibna ugudir boostada ama fakiska:
**Golaha Maareynta- Gudigga Racfaanka ee Legal Aid**
Dabaqa 4aad – 287 Broadway
Winnipeg MB R3C 0R9
Fakis: 204-944-8582
Warqadaha Racfaanka, ku sheeg sababaha aad ugu malaynayso in go'aanka qaldanyahay. Guddiga Racfaanka ayaa tixgelin doona sababahaaga waxayna dib u eegi doonaan faylkaaga. Guddiga Racfaanka ayaa go'aan ku gaari doona 1 – 2 toddobaad gudahood. Waxaad heli doontaa warqad ku ogeysiinaysa go'aanka Guddiga Racfaanka.
Guddiga Racfaanka go'aanku waa kama dambays. Mana jiro rafcaan kale.

## Legal Aid waxa ay i ogeysiisay in aan u qalmo dhaqaale ahaan, laakiin dembiga la igu soo oogay waa dembi xukun kaasoo kooban oo aan

## gaarsiisneyn in xabsi laigu xukumo, sidaas darteed iima magacaabi doonaan qareen. Mana awoodo inaan qabsado qareen. Ma jiraan doorashooyin kale?

Waxaad la xiriiri kartaa Jaamacadda Manitoba Xarunta Sharciga Bulshada. Xafiiskan waxaa ka shaqeeya ardayda sharciga barata, ardeydaas waxaa kormeereyaal u ah qareennada Legal Aid. Waxaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan arrinkaaga. Waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Sharciga ee Jaamacadda Manitoba: 1-833-502-0022

100 – 287 Broadway
Winnipeg, MB R3C 0R9
Website

## Legal Aid ma igu qasbi karaan inaan iibiyo hantidayda maguurtada ah?

Haddii aad u qalanto cawimaad dhaqaale, laakiin aad leedahay guri, waxa laga yaabaa Legal Aid  inay saarto hantidaada lacag tii ay kaa bixiyeen. Waxaad samayn kartaa heshiis aad kubixineyso lacagta Legal Aid. Hadii aad dhammayso lacagaha daynta ah waa laga dhaafaya lacagtii aad bixinjirtay,. Legal Aid kuguma qasbi karaan inaad iibiso ama aad dib u amaahiso gurigaaga.

## Waxaan cawimaad kahelay Legal Aid  si aan u kala tagno lamaanaheyga, laakiin hadda aniga iyo lammaanahayga dib ayaan isugu noqonay. Ma igu adkaan doontaa inaan mar kale helo caawimada Legal Aid?

Haddii aad weli u qalantid caawimaada Legal Aid , way kuu ogolaanayaan in laguu magac caabo qareen kasoo qabanaya  Dacwadada cusub. Si kastaba ha ahaatee, haddii ay tani dhacday dhowr jeer, waxaa laga yaabaa inay adkaato in qareen kale laga

helo Legal Aid. Legal Aid Waxey u egayaan xaalad kasta si gaar ah. Haddii aadan hubin la xiriir Legal Aid. Legal Aid.

## Waxaan ahay qof dakhli yar oo u baahan dardaaran qoraal ah. Xaq miyaan uleeyahay caawimaada Legal Aid?

Maya, *Legal Aid* ma daboosho dardaaranka, hantida, iyo adeegyada kale sida hantida ma-guurtada ah iyo arrimaha shirkadaha/ganacsiga.

## Maclumaad:

Haddii aad tahay qof da' ah, waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Khidmada dadka waa weyn (A & O Support Services for Older Adults) si aad uga heshid caawimaada qormada dardaaranka, awoodda qareenka, ama tilmaamaha daryeelka caafimaadka. A & O waxey la gacan saar la leyihiin, Xafiiska qareenada Boni Singbeil Stienstra si ay u bixiyaan adeegyadaas. Website
Waxa kale oo aad keligaa wici kartaa xafiiskaya qareenada si aad uwaydiiso qarashka kuxaya qorrmada dardaaranka.

## Gargaarka Sharcigu ma iga caawin karaan dacwada qof aan lacag ku leeyahay?

Maya. Arrimaha dacwadaha madaniga ah kuma jiraan Legal Aid.

**Tallaabooyinka Xiga:**
Waxaad u baahan doontaa inaad uraadsatid arrinkaan qareen kuu gaar ah. Waxaad weydiisan kartaa haddii qareenku aqbali doono kiiskaaga iyadoo loo eegayo heshiika "Guuleyso oo Lacag dhiib". Heshiiskaas wuxuu ka dhiganyahay in qareenku uu helayo boqolkiiba qoondo xadidan hadii aad ku guleysatid kiiskaaga. Si kastaba ha ahaatee, waxaad masuul katahay inaad bixisid kharashaadka hordhaca ah sida khidmadaha qormada dacwada, iyo kharashaadka kale ee heshiiska ah "Guuleyso oo Lacag dhiib". Qareenada oo dhan ma aqbalaan heshiiska "Guuleyso oo Lacag dhiib".

Haddii lacagta aad ku leedahay ay tahay $15,000 ama ka yar, waxaad dacwadada u gudbin kartaa Maxkamadda Dacwadaha Yaryar, adiga ayaana naftaada ku matali doona maxkamada. Waxaan haynaa macluumaad ku saabsan Maxkamadda Dacwadaha Yaryar, ka eeg boggeena. Website.

- **Fasaxa:** Ugu yaraan laba usbuuc oo fasax ah sanadka afarta sano ee ugu horeysa shaqadada, iyo ugu yaraan seddex usbuuc oo fasax ah kadib shan sanadood oo isku xigta markaad shaqeysid. Cidda aad u shaqeysi waxay bixinkaraan lacagta fasaxa waqtiga fasaxa, ama waxay ku dari karaan mushaharka fasaxa lacagaha shaqadada ee aad heshid sanadka dhexdiisa.
- **Nasashada:** 30 Daqiiqo oo mushar la'aan ah shan saacadood oo shaqo ah kadib. Sidoo kale waxaad xaq u leedahay ugu yaraan hal maalin (24 saacadood) oo fasax ah usbuuciiba.

Shirkadaha/ Dadka loo shaqeeyo, waxay bixin karaan wax ka badan heerarka ugu yar muasharka, laakiin ma bixin karaan wax ka yar, xitaa haddii aad saxiixdo heshiis oggolaanaya taas. Heerarka ugu yar muasharka waxaa usiman shaqaalaha waqtiga buuxa iyo shaqaalaha waqtiga barka ah.

Xeerka Heerarka Shaqaalaha kuma khuseeyo haddii aad tahay shaqaale si gaar ah oo madax-bannaan u shaqeysta, ama aad ka shaqeyso Shirkad/warshad dawladeed oo federaal ah. Shirkadaha/arshadaha qaarkood waxay leeyihiin waxyaabo u gaar ah oo ku saabsan heerarka musharka ugu yar. Wixii faahfaahin ah, booqo bogga internetka ee Heerarka Shaqaalaha, website. Ama wac 204-945-3352 (telefoon lacag la aan: 1-800-821-4307).

## Haddii aan la kulmo cadaadis ama takoor shaqada dhaxdeeda, wamaxay fursahada aan sameyn kara?

Sharci ahaan, goobtaada shaqo waa inay leedahay siyaasadda la tacaalista cabashada dhibaatooyinka. Siyaasadani waa inay kuu sheegto habka cabashooyinka loogu gudbin karo cidda loo-shaqeenaya. Haddii aad doorato inaad cabasho gudbiso, waa inaad la tashatid/ ogaatid siyaasadda si aad u ogaatid nidaamka saxda ah.

Sidoo kale, waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Manitoba. Looma baahna inaad marka hore raacdo siyaasadda goobtaada shaqo. Cabashooyinka guddiga waa in la gudbiyaa muddo hal sano ah

kadib dhacdada—ama haddii cadaadisku uu sii socdo, muddo hal sano ah oo ka soo bilaabata dhacdadii ugu dambeysay.

Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Manitoba
**Telefoon:** (204) 945-3007
**Toll-Free**: 1-888-884-8681
**Email:** hrc@gov.mb.ca

Haddii aad ka shaqeyso Shirkad/warshad hoostagta  xeerarka federaalka, waxaad cabashada u gudbin kartaa Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Kanada:

**Toll-Free:** 1-888-214-1090
Website

Haddii aad xubno ka tahay urur shaqaalo, heshiiskaaga guud ayaa laga yaabaa inuu qeexo nidaamka cabashooyinka. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada aadanaha ah lagu xadgudbay, waxaad  xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Manitoba (ama Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Kanada, haddii aad ka shaqeyso warshad hoostagta  xeerarka federaalka).

Haddii aad dareemeyso inaad la kulmeyso cadaadis goobtaada shaqo iyo inaad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xulashooyinkaaga, waxaad wici kartaa Barnaamijka Taleefanka Sharciga & Talo-bixinta Qareenada ee 204-943-2382 (Toll-Free 1-800-262-8800 ama email community@communitylegal.mb.ca).

## Cida loo-shaqeeynaya hadusan qaadin wax tallaabo ah kadib markaan ugeysiiyay dhibaato /cadaadis, maxaa dhacaya?

Sida ku xusan Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Manitoba, haddii cidda loo-shaqeenaya ay ku guuldareysto inuu qaado tallaabooyin macquul ah si uu u joojiyo cadaadiska, marka la ogeysiiyo kadib, taas ayaabo ah nooc ka mid ah cadaadis. Waxaad dacwad u gudbin kartaa Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Manitoba (ama Guddiga Xuquuqda

Aadanaha ee Kanada, haddii aad ka shaqeyso shirkad/warshad hoostagta xeerarka federaalka).

## Haddii aan ku dhaawacmo shaqada dhexdeeda, xaq miyaan uleeyahay magdhow?

Waa laga yaabaa. Haddii aad ku jirtid barnaamijka magdhowga shaqaalaha, si aad u hesho magdhow, waa inaad dalbataa magdhow adigoo u gudbinaya cabashadaada Golaha Magdhowga Shaqaalaha ee Manitoba (WCB). Si aad cabasho u dalbato, raac talaabooyinkan:

1. **Soo sheeg dhaawacaaga**: U sheeg kormeerahaaga, ama maamulahaaga, sida ugu dhakhsaha badan, 30 maalmood gudahood. Buuxi Foomka Ogeysiinta Dhaawaca ee ciddam loo-shaqeynaya. Kaydso nuqul kamid ah warqadaha aad buuxisay, sidookale ureeb nuqul cidda aad ushaqeyneysid . Cidda loo-Shaqeynaya waa ineey dacwada dhaawaca ugudbisaa WCB, shan maalmood oo ah maalmaha shaqa gudahood, kadib markeey heleen ogeysiiska dacwada. Kormeerahaaga ama ciida aad ushaqeyso kaama reebikaraan ama kaama niyad jabikaraan gudbinta dacwada.
2. **Hel daryeel caafimaad**: La xiriir bixiyahaaga adeegyada caafimaadka oo u sheeg in aad ku dhaawacantay shaqada. Waxay buuxin doonaan warqado kaa caawin doona WCB inay habeyso cabashadaada.
3. **Soo sheeg dhaawacaaga WCB**: Wac 204-954-4321 (toll-free 1-855-954-4321), ama kabuuxi foomka cabashada khadka internetka halkan here, ama buuxbuuxi foomka warbixinta Dhaawaca Shaqaalaha oo dhammeystiran kadib na kudir saxiix, oo kudir boostada ama Faks: 204-954-4999; Cinwaanka: 333 Broadway, Winnipeg, R3C 4W3.

WCB waxay qiimeyn doontaa cabashadaada waxayna go'aan kasoo saari doontaa inaad magdhow xaq u leedahay iyo inkale. Haddii cabashadaada la la ogolaado, waxaad xaq u yeelan dontaa magdhow sida; mushaharkaga lumay, daawooyinka, iyo kharashaadka daryeelkaga caafimaad.

## Codsigayga magdhowgaw ayaa diiday. Ma gudbin karaa racfaan?

Haa. Haddii aad aaminsan tahay in codsigaaga si khaldan loo diiday, la xiriir maamulahaaga kiiska si aad u eegto haddii xal loo heli karo. Haddii aan xal laga gaarin, waxaad buuxin kartaa foomka Codsiga Dib-u-eegista: Request for Review, waxaadna u diri kartaa: Xafiiska Dib-u-eegista: 333 broadway, Winnipeg, MB R3C 2X4

Haddii aadan ku qanacsaneyn go'aanka Xafiiska Dib-u-eegista, waxaad codsan kartaa racfaan Guddiga Racfaanka. Wixii faahfaahin ah, wac isku-duwaha jadwalka ee (204) 925-6114 (Kuwac si lacag ala'aan ah hadii aad joogtid meel kabaxsan Winnipeg). Website

## Sideen u codsan karaa mushaar ama lacag fasax oo aan laisiinin?

Marka hore, waa in aad dhibaatada kala hadashaa shaqaalahaa, maadaama ay suuragal tahay inay khalad sameeyeen oo aysan ogaan. Haddii aadan xal u helin, waxaad codsi ka sameyn kartaa Xeerka Shaqooyinka (foomka codsiga waxaa laga heli karaa halkan here).

Waa inaad dirtaa codsi muddo lix bilood gudaheeda laga bilaabo maalintii ugu dambeysay eed shaqeysay, ama lix bilood gudahood markii mushaarkaga uu diyaar noqday.

## Xageen kaheli karaa xog ku saabsan kiiskayga maxkamadda iyo baaritaankiisa?

CanLII (ama Machadka xogta Sharciga ee Kanada) waa urur aan faa'iido doon ahayn oo ay maamusho Isbahaysiga Ururada Sharciga ee Kanada. CanLII waxay leedahay xog ururin kusaabsan sharciga oo bilaash ah, oo ay ku jiraan kiisaska ka socda gobollada iyo dhulalka kala duwan ee Kanada. Waxaad ka raadin kartaa go'aanada maxkamadaha heerarka kala duwan, maxkamadaha, guddiyada, iyo hay'adaha

maamulka iyo kormeerka. Waxaa sidoo kale laga heli karaa sharciga iyo xeerarka bogga, iyo faallooyin sharciyeed.

Qeybta Manitoba ee *Can LII* waxaa lagahelaya xogta kiisaska ka socda Maxkamadda Racfaanka ee Manitoba, Maxkamadda King's Bench, iyo Maxkamadda Gobolka. Go'aano ayaa sidoo kale laga heli karaa Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Manitoba, Guddiga Shaqaalaha ee Manitoba, Guddiga Amniga ee Manitoba, Guddiga Racfaanka Caafimaadka ee Manitoba, Abaalmarinta Codaynta Shaqada, Guddiga Anshaxa ee Dhaqtarada iyo Qaliinka ee Manitoba, iyo Guddiga Anshaxa ee Ururka Sharciga ee Manitoba.

Maktabadda Sharciga ee E.K. Williams ee kulaato Robson Hall waxay leedahay xog uruurin  sharciyeed taaso ay helikaraan dadweynaha. Waxay ku taallaa 224 Dysart Road gudaha Jaamacadda Manitoba waxaana lagala xiriiri karaa 204-474-9995.

Hadii aad rabtid daawashada muqaalada fiiri halkaan:  Introduction to Legal Research

## Dhamrynta/ Joojinta Shaqada

## Cidda aan ushaqenayo miyeey ubaahantahay sabab ay iiga ceyriso shaqada?

Ciida aad ushaqeyso waxey kugu ceyrin karta sababo sax ah, taasoo micnaheedu yahay inaad jebisay heshiiska shaqadaada ama aad sameysay fal xun (sida xatooyo ama dayacaad shaqadaada). Si kastaba ha ahaatee, cidda loo shaqeeynaya waxeey sidoo kale kugu ceyrin kartaa adigoon sabab lahayn, haddii ay ku siiyaan ogeysiis ku habboon.

## Maxay tahay ceyrinta khaldan?

Shaqo Ceyrinta khaldan iskumid mahan, Sida adiga aad daremaysid  inaanad xaq u lahayn in laguu ceyriyo. Shaqo ka ceyrintu waxay khalad noqoneysaa haddii cidda loo shaqeynaayo aysan haysan sabab ay kugu ceyriiso oo aynna ku siin ogeysiis ku habboon ama lacag beddelka ogeysiiska. Waxaad ka arki kartaa shuruudaha ugu yar halkan here.

Haddii aad u maleyneyso inaad in si qaldan shaqada lagaaga ceyriyay, waxaad gudbisan kartaa codsi cabasho. La xiriir Xeerarka Shaqada si aad u heshid xog dheeraad ah adigoo wacaya (204) 945-3352 (la,barka bilaash ka ah: 1-800-821-4307). Sidoo kale waxaa laga yaabaa inaad ubaahantahay inaad la hadasho qareen yaqaano arimaha shaqooyinka si aad u ogaatid inaad xaq u leedahay lacag ka badan inta ugu yar ee ku xusan Xeerka Shaqada, ama ogeysiis iyo in aad xaq uleedahay inaad dacwad ka gudbin kartid ceyrinta qaldan.

## Waa Maxay Ceyrinta Dadban?

Ceyrinta dadban waxay dhacdaa marka loo shaqeeyaha uusan si toos ah u ceyrin shaqaalaha, laakiin uu Sameeyo jawi shaqo oo aad u xun ama aan la maareyn karin, taasoo keenta in shaqaaluhu is-casilo. Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara hoos u dhigista darajada shaqaalaha, hoos u dhigista mushaharka shaqaalaha, beddelka goobta shaqada ee shaqaalaha, ama si aan caddaalad ahayn u dhaleeceynta waxqabadka shaqaalaha.

Si ceyrinta dadban loo tixgeliyo, habdhaqanka cidda loo shaqeynaya waa ineey noqotaa xadgudub weyn oo ka kahor imanayaa heshiiska shaqada, waxaana loo eegi doonaa duruufaha. Tusaale ahaan, haddii loo shaqeeyuhu hoos udhigo saacadaha shaqada ee shaqaalaha sababtuna tahay inuu rabo in uu shaqaalaha ka tago, tani waxay noqon kartaa ceyrinta dadban, laakiin haddii loo shaqeeyuhu hoos u dhigo saacadaha shaqada sababtuna tahay in aysan jirin shaqo kulfilan shaqaalaha, taasi ma ahan ceyrinta dadban.

Si aad u aragto haddii aad leedahay Dacwad sheegasho ceyrinta dadban, la xiriir qareen shaqo.

## Cidda loo shaqeynaya miyeey u baahantahay ineey ku ogeysiiyan ka hor inta aanay ku ceyrin?

Badanaa, haa. Tirada ogeysiiska waxay ku xiran tahay inta waqti ee aad u shaqeysay Cidda loo shaqeynaya. Sida ku xusan Xeerka Heerarka Shaqada ee Manitoba, muddada ogeysiiska waa:

- Ka yar 30 maalmood: Ogeysiis looma baahna.
- 30 maalmood ama ka badan, balse ka yar hal sano: Hal usbuuc ogeysiis ah.
- Hal sano ama ka badan, balse ka yar saddex sano: Labo usbuuc ogeysiis ah.
- Saddex sano ama ka badan, balse ka yar shan sano: Afar usbuuc ogeysiis ah.
- Shan sano ama ka badan, balse ka yar toban sano: Lix usbuuc ogeysiis ah.
- Toban sano ama ka badan: Siddeed usbuuc ogeysiis ah.

Loo shaqeeyahaaga waxa uu dooran karaa inuu kuu oggolaado inaad shaqeyso inta lagu jiro muddada ogeysiiska, ama uu kuu ogolaado inaad joojiso shaqada wakhti hore isla markaana uu ku siiyo lacagta wakhtiga aad shaqayn lahayd. Tusaale ahaan, haddii aad ka shaqeysay shaqadaada in ka badan tobaneeyo sano, loo shaqeeyahaaga waxa uu dooran karaa inuu ku ceyrayo isla markiiba isla markaana uu ku siiyo mushaharka sideed usbuuc, ama inuu kuu oggolaado inaad shaqeyso afar usbuuc oo uu bixiyo mushaharka afarta usbuuc ee harsan. Tani waxaa loo yaqaannaa "lacag baddelka ogeysiiska" (payment in lieu of notice).

Ogeysiis looma baahna xaalado gaar ah, tusaale ahaan haddii aad ka shaqeyso warshadaha dhismaha ama haddii si caddaalad ah laguu ceyriyo.

Haddii loo shaqeeyahaaga uu si khaldan kugu ceyriso, waxaa laga yaabaa inaad tagto maxkamad (the Manitoba Courtof King's Bench) si aad uga dacwooto ceyrinta khaldan. Waa inaad heshaa qareen kuu gaar ah, ama naftaada ku matashaa dacwadda. Haddii maxkamaddu ay go'aamiso in  si khaldan laguu ceyriyay, ma amreyso in loo shaqeeyahaaga kugu celiyo shaqada, laakiin waxay amar ku siin kartaa in loo shaqeeyahaaga uu bixiyo magdhow (lacag). Qaddarka magdhowga waxa uu ku xiran yahay dhowr arrimood. Arrinta ugu muhiimsan waa muddada aad shaqeysay. Waxaad la xirii kartaa qareen yaqaano arimaha shaqada si aad u ogaatid inaad xaq u leedahay lacag ka badan inta ugu yar ee labixiyo mushahar ahaan, ama lacagta ogeysiiska inta

ugu yar sida ku xusan Xeerka Heerarka Shaqada, iyo haddii aad dacwo ka gudbin kartid ceyrinta qaldan.

## Waa maxay lacagta badalka ah (Severance pay)?

Lacagta badalka ah waa lacag la siiyo shaqaalaha haddii ay shaqada lagatiro sabab la'aan. Sharciga Manitoba si gaar ah uma qoondeyn  badalka lacageed ee shaqaalaha. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad ka shaqeyso warshad laga maamulo heer fadaraal, waxaad xaq u yeelan kartaa bdal lacageed oo  aadna la shaqeysay mudo hal sano ama ka badan. Qandaraaskaaga shaqo ama heshiiska wadajirka ah ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu ku siinayo badal lacageed.

Mararka qaarkood, dadka waxay magaca "lacagta badalka" ku qayaxaan "lacagta kadalka ah ogeysiiska" (payment in lieu of notice). Manitoba dhaxdeeda, waxaa lagaa doonayaa in ogeysiis lagu ssiyo ama lacag beddelka ogeysiiska, laakiin si toos ah xaq ugmalihid badalka lacageed.

## Ogeysiis inaan bixiyo miyaa laiga baahanyahay haddii aan ka tagayo shaqada?

Badanaa, haa. Haddii aad shaqaale ka aheyn meesha aad ka shaqeysay hal sano ama ka badan, waa inaad bixisaa ugu yaraan laba toddobaad oo ogeysiis ah. Haddii aad ushaqeysay inta u dhaxaysa 30 maalmood ilaa hal sano, waxaad u baahan tahay inaad bixisaa hal toddobaad oo ogeysiis ah. Haddii aad shaqeysay in ka yar 30 maalmood, uma baahnid inaad bixisid ogeysiis.

Haddii aad ujirtay qandaraas shaqo ama heshiis wadajir ah, waa inaad hubisaain lagaga baahanyahay inaad ogeysiisid cidda aad ushaqeyneyso muddo ka badan laba toddobaad.

Xaalado gaar ah, uma baahnid inaad bixisid ogeysiis, tusaale ahaan haddii loo cidda aad ushaqeysneyso kugula kacaan fal xadgudub ah ama rabashad. Wixii faahfaahin dheeraad ah, booqo bogga Shuruucda Shaqada. Website.

## Muddo intee la eg ayeey ku qaadaneysa cidda loo shaqenayo Ineey sameeyo diiwaangalinta Diiwaanka Saacadaha Shaqada (ROE)?

Xeerka guud ayaa ah in cidda loo shaqeynaya ay kuu xareyso Diiwaanka Shaqada 5 maalmood gudaheed oo kamid ah maalmaha shaqasa laga bilaabo maalintii ugu dambeysay eed mushahar qadatay shaqadana kugu dambeysay, (sida shaqo joojin, ka tagista shaqada, ama shaqo ka mamnuucid). Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira xaalado gaar ah. Wixii faahfaahin dheeraad ah, booqo bogga. website.

## Looshaqeeyaha Mustaqbalka Miyuu Arki Karaa Diwaanka Saacadaha Shaqada "Record of employment" (ROE)?

Maya, iyadoon oggolaansho kaa helin. **Diwaankaga Saacadaha Shaqada** xogtiisa waxa kaliya isticmaali kara *Canada Service* si ay u go'aamiyaan inaad xaq u leedahay caymiska shaqada (Employment Insurance - EI) iyo inkale. Iyo inta lacag eed xaq u leedahay.

-Dhamaad-